

**“Sacbul” - Cali Axmed Raabbi “Cali Seenyo”: faallayn iyo sharraxaad**



Sawir: 1aad - Cali Axmed Raabbi "Seenyo" iyo Dr. Jama Musse Jama, Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa, 2020.

Dr. Jama Musse Jama

Meey, 2020

Lix ka mid ah maansooyinka uu Cali Axmed Raabbi “Cali Seenyo” tiriyeey waxa ay ka hadlayaan diririhii ka dhexoogmay dadka walaalaha ah ee wada dega dhulalka Somaliland. Maanso kasta markan uu abwaanku tirinayo, waa markii ay ugu xanuunka badnayd colaaddaasi uu ka hadlayaa. “Sacbul” (1992) waxa uu tiriyeey kolkii magaalada Burco dagaal qabyaaladaysan oo foolxumi ka dhex qarxey reeraha wada dega. “Madhax” (1993) waxa uu tiriyeey kolkii magaalada Berbera la isugu diley qabyaalad siyaasad salka ku haysa. “Tabaalada dhacday” (1996) waxa uu tiriyeey kolkii magaalada Hargeysa dagaal siyaasadeed oo la qabyaaladeeyey lagu kala irdheeyey dadkii wada dhashay. “Dhumeey” (2018) waxa uu tiriyeey kolkii degaanka Dhumeey ee gobolka Sool laba jilib oo magacwadaagaa isku ahi ku dagaallameen; iyo ugu danabayn “Ceel afwayn” (2019) waxa uu tiriyeey kolkii bariga Somaliland markale dagaal laba jilib oo hoose isku gumaadeen gobolka sanaag gaar ahaan degmada Ceel Afwayn.

Halkan waxa aynu ku soo bandhigaynaa, oo sharraxaynaa ereyadeeda maansada kowaad ee *Sacbul*. Cali Seenyo waa abwaan aad u fiiro dheer, qabyaaladdana neceb, kuna dhiirran sheegista xumaanta haddii ay mur ka qadhaadhahay. Waa shaqsi ay ka dhab tahay jiritaanka qarannimada Somaliland iyo ummad jacaylku. Waxa kale oo aynu taxanahan maansooyinkiisa ku arkaynaa hodantinnimada afka, doorashada ereyga, iyo suugaan-aqoonnimada Cali Seenyo. Gabay kasta waxa aynu sharxi doonnaa ereyada innoola muuqda in uu Afsoomaali ahaan adeegsigooda maanta yaryahay, oo laga yaabo in aan la wada aqoon, ama ereyada maldahan ee macno kale ugu jira maansada.

Maasanda *Sacbul* (12.03.1992) waa gabay (miisaanka 20-le, shan jaamood ah oo saddexna xuddunta ka horreyso labana xuddunta ka danbayso), xarafaaceedu S-ley yahay, oo ka kooban 112 sadar. Waxa aynu dhuganaynaa habdheceeda quruxda badan ee abwaanku ku xarragoonayo, oo saddex sifo oo ay leedahay ka eegi doono, kuwaas oo kala ah:

1. Isoggolaanshaha ereyga “ha” (hasha uu abwaanku u adeegsanayo hummaagaynta qarannimada Somaliland iyo dhibka loo soo maray). Habdhaca miyuusiga leh ee uu

abwaanku beegaal ka dhiganayo hasha, waxa laga dhadhansanayaa dareen argaggax leh oo ah dhibkii uu u soo maray. U firso sadarrada 1-23 oo si joogta diiraddu saarantahay hasha. Habdhaca qaybtan ee shanta jaamood ahi ( ),oo ay saddex jaamoodna ka horreeyaan sashuurada, laba jaamoodna ay ka danbeeyaan, waa sidan, tusaale ahaan:

*Sarkadhaban baqoolaha hashaan, silic wareegaayay*

{( xxxx ) / ( x-xx ) / (x- ) // (xxx ) / ( -- x )}

*Soolkiyo dhibaataada hashaan, daba saqlaynaayay*

{(-xx) / (x-xx ) / ( x- ) // ( xxx ) / ( --x )}

<b>Isoggolaanshaha ereyga 'hal' ee maansada 'Sacbul': hashaan, hashii, hashuu</b>		
Sarkadhaban baqoolaha	<i>hashaan</i>	silic wareegaayey
Soolkiyo dhibaataada	<i>hashaan</i>	daba saqlaynaayey
Suudigiyo xeebaha	<i>hashaan</i>	seegay danahayga
Salcaankiyo dhibaataada	<i>hashaan</i>	siic la daba joogay
Samaddiyo kulaylaha	<i>hashaan</i>	oonka saxariiray
Surmi iyo dhanqalankii	<i>hashaan</i>	soohmay dubayoowga
Safradda iyo gaajada	<i>hashaan</i>	dhab ula sooyaamay
Sinniqsiga abeesadu	<i>hashaan</i>	saydhay boqontayda
Sabarkayga macaluul	<i>hashaan</i>	suufka ugu gijjay
Saqla-orod-gudoodiga	<i>hashaan</i>	raacdo suxulduubay
Sarmaantiyo cadaaddiyo	<i>hashaan</i>	seeriga u jiidhay
Saqda dhexe habeenkii	<i>hashaan</i>	seexasho u diiday
Saryankiyo libaax iyo	<i>hashaan</i>	saayo ka ilaashay
Axmedow	<i>hashii</i>	tobanka sano, suudha igu reebtay
Seedaha daraadeed	<i>hashii</i>	horarka loo siiyey
Saymaha colaadeed	<i>hashii</i>	rag isku seeraaray
Sakal oodan iyo laag	<i>hashii</i>	uub i solansiisay
Sumuc iyo rasaastii	<i>hashii</i>	suugga lagu qaaday
Sanbabada	<i>hashii</i>	aawadeed soodhku dalamleeyey

Sararaha	<i>hashii</i>	lagaga jabay, dhiigna lagu saantay
Soobirrada	<i>hashii</i>	lagu axmee, saaqid lagu toogtay
Sursur adag	<i>hashii</i>	lagu dhacsaday, salawga maadhiinka
Saajica magiigani	<i>hashuu</i>	sulub ku raacdeeyey

2. Sanniga ereyga oo muujinaysa hodantinnimada afeed ee abwaanka. Tusaale ahaan kulaylka uu usoo marayo hasha badbaadinteeda, waxa ayuu abwaanku u adeegsanayaa ereyada xaraf-raaca s-da ee “sool”, “suudi”, “samad”; sidoo kale sifada doqonnimada uu ku liidayo ee dagaaloogaha waxa uu adeegsanayaa ereyada “sacsac”, “sunbay”, “sagagar”, “siiqaa”, “saawir”, “sawdhe”, “hacoo” iyo qaar kale oo ka samaysmay lammaanaynta ereryga: “Ma-siqsiqe”, “Ma-siddiqe”, “Ma-sarriigte”, “Ma-salcaame”, “Soorkama-dibbire”, “Soddon-jeeble”, “Sayax-dhawrte”, “Sarrif-doonte”, “Indho-suhuble” iyo “limaan-satile”. Qofka doqonka ah waxa lagu gartaa bay Soomaalidu tidhaahdaa hadalkiisa (kolka uu erey ama laba yidhaahdo); ficilkiisa (kolka uu mar ama laba gef ficil doqonnimo ah sameeyo); ama qaabkiisa (qofku sida uu u socdo, isu basriyo uguna muuqdo dadka uu isa soo hortaago). Abwaanku intaba wuu adeegsanayaa.
3. Saddex-dhaca saddarrada 86-79aad oo habdhaca, kolka lagu qaadayo, aad u dhadhan wanaagsan, isla markaana aad dareemayso in abwaanku sida hubka darandoorriga u dhaca uu ugu tiiqtiqsanayo doqonka uu la hadlaayo ee dagaal-oogenimada iyo tuugnimada isku darsaday. Saddexleydu, hab-dhaca meeriska saddex shub ayay ka dhigtaa oo shantii jaamood bay jaan, iyo laba iyo laba kala rogan u ridaa. Tusaale:

*Ma siqsiqe, xumaan kama sikade, sarara wayloodle*

{(xxxx) / (x—xx) / (xxx) // (xxx) / (— —x)}

*Ma siddiqe, samaantana ka nexa, salalka baaweeyo*

{(xxxx) / (x—xx) / (xxx) // (xxx) / (— — x)}

### Saddexdhaca maansada 'Sacbul'

Sacsac liita	siiqaa hurshi leh	sagagar toodheeya
Sunbay nacas ah	sawdhiyo hadoo	salal-madhlaa yuuban
Sirgay madhac xun	saawir u af daran	nacabka siidhkiisa
Siqiir iyo kabiir	kama yaxyaxe	Siraw candhooleeye
Ma siqsiqe	xumaan kama sikade	sararo wayloodle
Ma siddiqe	samaantana ka nexa	salalka baaweeye
Ma sarriigte	ceeb kama sikade	salalmac quud moode
Ma salcaame	soorkama dibbire	suququl joogtaale
Soddon jeeble	saamiga bulshada	sacab ku doondoone
Sayax dhawrte	jaajaan sawaab	sabarad ceel geeye
Sarrifdoonte	xaaraan ku sehe	sacaw hallaagaale
Indhosuhuble	iimaan satile	suulal gorayaale

Sacbul, 13.03.1992 – Cali Axmed Raabbi “Cali Seenyo”, Copenhagen, Denmark.

Axmedow <sup>1</sup> hashii tobanka sano, suudha <sup>2</sup> igu reebtay	01
Sarkadhaban <sup>3</sup> baqoolaha <sup>4</sup> hashaan, silic wareegaayey	
Soolkiyo <sup>5</sup> dhibaatada hashaan, daba saqlaynaayey	
Suudigiyo <sup>6</sup> xeebaha hashaan, seegay danahayga	
Salcaankiyo <sup>7</sup> dhibaatada hashaan, siic <sup>8</sup> la daba joogay	05
Samaddiyo <sup>9</sup> kulaylaha hashaan, oonka saxariiray	
Surmi iyo dhanqalankii hashaan, soohmay dubayoowga <sup>10</sup>	
Safradda <sup>11</sup> iyo gaajada hashaan, dhab ula sooyaamay <sup>12</sup>	
Sinniqsiga abeesadu hashay, saydhay boqontayda	
Seedaha daraadeed hashii, horarka loo siiyey	10
Sabarkayga macaluul hashaan, suufka ugu giijay	
Saqla-orod <sup>13</sup> gudoodiga <sup>14</sup> hashaan, raacdo suxulduubay	
Sakal <sup>15</sup> oodan iyo laag <sup>16</sup> hashii, uub <sup>17</sup> i solansiisay <sup>18</sup>	
Sarmaantiyo cadaaddiyo hashaan, seeriga <sup>19</sup> u jiidhay	

---

<sup>1</sup> Axmed Aw Diiriye Liibaan.

<sup>2</sup> Suudha = urta qadhuun – halkan waxa loola jeedaa dhididkii iyo dhibtii iga gaadhay hashaa.

<sup>3</sup> Sarkodhaban = waa dhibicda hore ee roob arooryaad oo dabayl qabow leh.

<sup>4</sup> Baqoolaa = waa socdaal bilowgii.

<sup>5</sup> Sool = kulayl.

<sup>6</sup> Suudi = kulayl.

<sup>7</sup> Salcaan = daal.

<sup>8</sup> Siic = macaluul halka gaadho ugu xun.

<sup>9</sup> Samad = kulayl.

<sup>10</sup> Dubayowga = ku dubmayga: wuu ku gubtey.

<sup>11</sup> Safrad = gaajada subaxa hore.

<sup>12</sup> Sooyaam = gaajada lala wareero.

<sup>13</sup> Saqla-orod = orod katlo ah oo in badan la ordo. Tus. wuu saqlaynayaa.

<sup>14</sup> Gudoodiga = goor habeen: tusaalahan goor habeen ah ayuu si saqlayn ah u ordayey.

<sup>15</sup> Sakal = (magac dhedig u akhri) geedo qodaxleh meel cidhiidhi ah.

<sup>16</sup> Laag = (magac lab u arkhri) jar dheer.

<sup>17</sup> Uub = (magac dhedig) jar dheer. Awrta xidhiidhsan kolka la wado ayaa la yadhi “uub eeg!”.

<sup>18</sup> Solansiisay = oggolaaynsiin. Biyaha ayaa la yidhaa, haddii aanay qaboobayn qofka aad harraaddan soli maayaan; oo looga jeedo harraadka ka biin maayaan.

<sup>19</sup> Seeri = geed qodaxleh oo qorfo ku yaalla.

Saqda dhexe habeenkii hashaan, seexasho u diiday 15  
 Saymaha colaadeed hashii, rag isku seeraaray  
 Sumuc iyo rasaastii hashii, suugga lagu qaaday  
 Sanbabada hashii aawadeed, soodhku dalamleeyey  
 Sararaha hashii lagaga jabay, dhiigna lagu saantay<sup>20</sup>  
 Soobirrada<sup>21</sup> hashii lagu axmee, saaqid lagu toogtay 20  
 Saajica<sup>22</sup> magiigani hashuu, sulub<sup>23</sup> ku raacdeeyey  
 Saryankiyo<sup>24</sup> libaax iyo hashaan, saayo<sup>25</sup> ka ilaashay  
 Sursur<sup>26</sup> adag hashii lagu dhacsaday, salawga maadhiinka

Waxay soomalhaaddoba<sup>27</sup> markaan, sabada soo joojay 24  
 Seeraha markii aan ku furay, saaca<sup>28</sup> dhiniciisa  
 Saarkiyo<sup>29</sup> markay dhawr habeen, soonahdii<sup>30</sup> guratay  
 Sarcanyaha markii ay candhada, gaax ka soconwayday  
 Sebigiyo cirrooluhu markuu, sacabka boodaayey  
 Soddohuu markii ay mushxarad, salaliyeen beesha  
 Sadadii markay soo gashee, saxalkii waydaartay  
 Inuu sabankii nagu soo noqdaa, waa saboolnimo e; 31

Afar saancaddaalaa la yidhi, huge<sup>31</sup> samaantiye

<sup>20</sup> Saantay = doorsaday, iibsaday: Lacag buu ku saantee, ma isagaa inantaa guursan karayay!.

<sup>21</sup> Soobir = waa nin doob ah oo xoog leh: Tusaale meeriska maanasadan waatuu abwaankeedu lahaa "Sibreheeda waa ooli jirey, soobir qaawani e."

<sup>22</sup> Saajic = geesi.

<sup>23</sup> Sulub = hubka lagu dagaallamo. Halkan waxaa uu meerisku yidhi "Sulubka maadhiinka." Maadhin waxa uu ahaa bunduqii u horreeyey ee Soomaalidu aragto. Waxa uu ahaa xabad-keliyaale.

<sup>24</sup> Saryan = biciidka lab.

<sup>25</sup> Saayo = daayeerka dheddig.

<sup>26</sup> Sursur = luuq, marin cidhiidhi ah.

<sup>27</sup> Soomalhaad = harraad aad u daran.

<sup>28</sup> Saac = uraad ama urshi: manfaca daaqa leeyahay.

<sup>29</sup> Saar = daaqa geedka sare.

<sup>30</sup> Soonah = nooc doogga ka mid ah.

<sup>31</sup> Huge = hug - haragga xoolaha laga saarayo ee baruurta yar mindi xalleef ah lagaga reebo.

Subaggaan filaayaa la yidhi, saacuf<sup>32</sup> buu dhalaye  
Waa sulaaqanyay baa la yidhi, sixinkii Caarraw<sup>33</sup> e  
Sunbaa loogu daray baa la yidhi, sabiga caaniye  
Silicbay ku nooshaa la yidhi, saaka maataduye 36  
Siciid<sup>34</sup> iyo agoon baa la yidhi, seerigaa<sup>35</sup> dilaye  
Ummul sabarku buuxaa la yidhi, seedahaa go'aye  
Sanbakkii ku faaf baa la yidhi, sadhadii beelaha e

Salli qudha dadkii wada fadhiyey, saydhan baahida e 40  
Saantii aboor baa ku baxay, shacabku saarraaye  
Sinta dumarka caydiga ku jira, yaan la saamixine  
Sirriqaha<sup>36</sup> la qooliyo xadhkaha, laysu saynsaabay<sup>37</sup>  
Sirta iyo boholahaa la qoday, seefta lagu qaadhshay<sup>38</sup>  
Sadrigooda muu laasimeen, sagagar duulaaye<sup>39</sup> 45

Si qudhaan wax loo wada arkayn, seeska nololeed e  
Maantana sabeentii Barrow<sup>40</sup>, sumalxad<sup>41</sup> weeyaane  
Sawir<sup>42</sup> iima goyn wiilashaan, soofka<sup>43</sup> raacsadaye  
Sacbul<sup>44</sup> waxay yidhaahdeen dadkii, saaray heegada e  
Isha saxar ku dhaco teeda kale, waa u sirirtaaye 60  
Sumcad ma leh ninkii hooyadii, suubban weeraraye  
Aboodiga sabyaantiisa<sup>45</sup> cunay, saayiraad ma lehe

<sup>32</sup> Saacuf = xumaado oo ur yeesho, sida caanuhu kolkay soo baqayaan.

<sup>33</sup> Caarre = wuxuu ka mid ahaa odayadii Denmark markaa degganaa ee taageersanaa nabadda.

<sup>34</sup> Siciid = ma aha magac e waa qofkasta oo wanaagsan.

<sup>35</sup> Seeri = harraad colaadeed iyo hagardaamo.

<sup>36</sup> Sirriq = dabin.

<sup>37</sup> Saynsaab = dembebes, isu qarin.

<sup>38</sup> Qaadhshay = dhuubay, qallajiyey si ay u qaro yaraato oo u qarsoonto.

<sup>39</sup> Sagagar duula = doqon seef-la-bood ah.

<sup>40</sup> Barre = Ismaaciil Cali Cabdi "Ismaaciil Barre".

<sup>41</sup> Sumalxad = sabeenta u dhuumata sumalka ee ilamaha qaadda xilli aan loogu tali gelin.

<sup>42</sup> Sawir = daabka godinta.

<sup>43</sup> Soof = duunyada.

<sup>44</sup> Sacbul = ama buljac waxa yidhaa carruurta doonaysa inay isku dirto laba wan oo madaxa isugu dhufata.



Soodhkaad dadkaaga u haysaa, wuu ku sababaaye  
 Inkastuu ku saacido wakhtigu, kuna sabaaleeyo  
 Salladdaada dhiig baa ku jira, saymo iyo hoog e 65  
 Saba carun<sup>46</sup> leh inaan reer furtaa, siinka kuma taal e;

Sacsac liita, siiqaa<sup>47</sup> hurshi<sup>48</sup> leh, sagagar toodheeya<sup>49</sup>  
 Sunbay<sup>50</sup> nacas ah, sawdhiyo<sup>51</sup> haco, salal-madhlaa yuuban  
 Sirgay<sup>52</sup> madhac<sup>53</sup> xun, saawir<sup>54</sup> u af daran, nacabka siidhkiisa 70  
 Siqiir iyo kabiir kama yaxyaxe, Siraw<sup>55</sup> candhooleeye<sup>56</sup>  
 Ma siqsiqe<sup>57</sup>, xumaan kama sikade, sararo wayloodle  
 Ma siddiqe<sup>58</sup>, samaantana ka nexa, salalka baaweeye<sup>59</sup>  
 Ma sarriigte, ceeb kama sikade, salalmac<sup>60</sup> quud<sup>61</sup> moode  
 Ma salcaame<sup>62</sup>, soorkama dibbire, suququl joogtaale 75  
 Soddon jeeble, saamiga bulshada, sacab ku doondoone  
 Sayax dhawrte, jaajaan sawaab, sabarad ceel geeye  
 Sarrifdoonte, xaaraan ku sahe<sup>63</sup>, sacaw<sup>64</sup> hallaagaale<sup>65</sup>

---

<sup>45</sup> Sabyaan = waa carabiyeyn wadarti sabi. Halkan waxay ugu jirtaa “dhashiisa”.

<sup>46</sup> Carun = [Magac lab] doog naq ah oo aan ku bixin digo. Xoolaha ayaa ku naaxa. Doogga ku baxay dagal ay digo taallay kal hore waxa la yidhaahdaa fushada, xooluhuna kuma naaxaan.

<sup>47</sup> Siiqaa = nacas.

<sup>48</sup> Hurshi = uskag leh.

<sup>49</sup> Toodheeya = si xun u socda.

<sup>50</sup> Sunbay = doqon

<sup>51</sup> Sowdhe = doqon ay doqonnimadu ka muuqato qaabkiisa.

<sup>52</sup> Sirgey = doqon. Waa halka inanta doqonta ah la yidhaa sirqo, inanka waa sirgey.

<sup>53</sup> Madhac = magac.

<sup>54</sup> Saawir = mindida aan afka lahayn.

<sup>55</sup> Sirow = hal magaceed.

<sup>56</sup> siraw candhooleeye

<sup>57</sup> Siqsiqe (ma siqsiqe) =

<sup>58</sup> Siddiqe (ma siddiqe) = ma rumayste.

<sup>59</sup> Salalka baaweeye = qofka buunbuuniya xumaanta ee hayaay ka kacaayda wada.

<sup>60</sup> Salalmac = waa geed midho leh oo la cuno

<sup>61</sup> Quud = cunto.

<sup>62</sup> Salcaame (ma salcaame) = daale (mmaddaale).

<sup>63</sup> Sahe = ka macaashe.

Indhosuhuble<sup>66</sup>, iimaan satile<sup>67</sup>, suulal gorayaale;

Siyaasi iyo oday waashay iyo, seefi nimay qaaday<sup>68</sup> 80  
Sarkaal iyo askari daydaya<sup>69</sup>, iyo surin dhuljiif<sup>70</sup> taagan  
Mid kastoo dan gaara u socda, oo si xun u ceeshaaya  
Saatirkaannu bariniyo Raxmaan, Suubbanaw Nabiye  
Ilaahay ku soo saar khalqiga, saa'id baad tahaye;

Balse yaanan seeraha ka bixin, siiqa maansada e 85  
Sarta oloshay, suuggiyo madfaca, sabada aafawday  
Kaaraha susumayiyo waqlaha, seedka<sup>71</sup> ka habaabay  
Beebeega saadada mariyo, sawjarrada hoobtay  
Sokeeyahaa iswada dooxay iyo, seefta dami wayday  
Isa sudhan xigaalka is wanjalay, saanadda hallawday 90  
Surka go'an, darbiga maydka sudhan, sabiga ooyaaya  
Giddi waxa is wada saafayiyo, sidigta dhaadhyawday<sup>72</sup>  
Sankaygoo qudhmay ila yihiin, saaka idilkoode  
li siman sohdi<sup>73</sup> Caynabiyo<sup>74</sup>, Samatar<sup>75</sup> beel taalle

---

<sup>64</sup> Sacow = doqon.

<sup>65</sup> Hallaagaale = Sacow hallaagale waxa loo jeedaa doqon heerar leh oo uskagna ka muuqdo korkiisa.

<sup>66</sup> Indha-suhuble = Indha-suhub = godinta yare ee koorta meesha aad u adag een la arkayn lagu qoro. Qof aad u indhoyuuban oo meel adag wax ka arkaya.

<sup>67</sup> Satile = satigu waa xeedhada amase kolaygya lagu fadhiisiyo.

<sup>68</sup> Seefi nimay qaadday, waa maahmaahdii ahayd: "Nin soori qaadday waa nin seefi qaadday". Waana sooxigasho qurxoon.

<sup>69</sup> Dayday = shufto. Kolkii dalka la soo galay dhallinyaradii dariiqyada goysay ee dadka baadhanaysay baa la odhan jirey deydey.

<sup>70</sup> Dhuljiif = shufto. Kolkii dalka la soo galay iyo horteedba, dhallinyaro jidgooyo u gali jirtey sahan ka iyo socotada oo baadhan jirtey.

<sup>71</sup> Seed = [Magac lab].

<sup>72</sup> Dhaadhyow = shaashowday, caabuqdey. Hasha candhadu xanuuntey ee kolka la isyidhaa lisa damqata ee dhaqaaqda. "Nabadii buu dhaadhyeeyey"

<sup>73</sup> Sohdi = goobtii.

<sup>74</sup> Caynaba = tuulo ku taalla bariga Somaliland

Giddi way i wada saacidaan, maalintaan saho <sup>76</sup> e	95
Sinbiidhaha Togdheer <sup>77</sup> baan maqloo, waan silloonahaye	
Waan sirinqirqaysnahay warkay, igu salaameene	
Sallin dhaha, subxaanana ku dara, sawdka kor u qaada	
Rabbi in uu sandaho <sup>78</sup> oo naflaha, diinta solansiiyo	
Innagana samii layna faray, innagu seeteeyo	100
Subciyaay Quraankiyo xamdiga, suuradaha Eebbe	
Kuna suga <sup>79</sup> , kitaab iyo xadiis, waxaad samayn doonto.	102

---

<sup>75</sup> Samatar = Samatar Axmed waa tuulo ku taalla bariga Somaliland.

<sup>76</sup> Saho = tabayo: Maalintaan wax tabayo oo u baahdo way i saacidaan.

<sup>77</sup> Togdheer: Gobolka Togdheer ee Somaliland ayuu ka dagaalka abwaanku ka walaacsanyahay uu ka bilaabmay.

<sup>78</sup> Sandaho = Nadiifiyo, koryeelo: Eebbe innaga badbaadiyo.

<sup>79</sup> Suga = ka yeela, xaqiiqdeeda hela. Ka digtoonow ma aha “sug” (ha raagsan ee sug) ay –ga’du culustahay e waa “sug” == ka yeelay (arrinku sidaasay ku sugnaatay).